

# Dib ucelinta Canshuurta Carruurta Minnesota: Caawinta Qoysaska iyo Carruurta!



Dib ucelinta Canshuurta Carruurta waxay ka caawisaa qoysaska carruurta leh inay helaan nafis canshuur ah. Waxay yarayn kartaa lacagta canshuurta aad bixinayso waxayna kuu keenaysaa lacag celin haddii ay kugu soo hagaagto.

## Ma u qalmaa Dib ucelinta Canshuurta Carruurta?

Guud ahaan, waa inaad buuxisaa shuruudahan si aad u dalbato Canshuur celiska Carruurta ee Waaweyn ee u Qalmata:

- Waxaad ahayd deggane buuxa ama mid qayb kamid ah sannadka 2024 ee Minnesota (iyadoo qaarkood laga reebayo xubnaha milatariga)
- Ma tihid qof ku tiirsan qof kale.
- Waxaad leedahay mid ama in ka badan oo “carruur waaweyn ee u qalma” sida ee qeexayday IRS

## Taasi waa imisa?

Canshuur celiska ugu badan waa \$1,750 ilmo kasta oo 18 jir ka yar, iyadoo aan xaddidnayn tirada carruurta la sheeganayo.

Dib ucelinta waa la dhimayaa haddii dakhligaagu ka badan yahay \$36,880 ee xaas si Wadajir ah u soo Gudbiyaan ama in ka badan \$31,090 ee soo gudbiyeyaal kale.

## Sidee u Codsan karaa?

Dalbo dib ucelinta Canshuurta Carruurta adiga oo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, Dib ucleinta canshuurta Carruurta iyo Qoysaska Shaqaalaha ee Minnesota.

Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa diyaarinta canshuur celinta oo lacag la'aan ah! Booqo [www.revenue.state.mn.us](http://www.revenue.state.mn.us) oo gal **diyaarinta canshuurta la'aanta**, firi sanduuqa Raadinta si aad u hesho adeegyada diyaarinta canshuurta lacag la'aan ah oo kuu dhow.

